



Ka ilaali ilmahaaga Cagaarshowga B

Caabuqa fayraska Cagaarshowga B ee qofka uurka leh wuxuu u gudbi karaa ilmahiisa marka uu dhasho. **Barnaamijka Kahortagga Cagaarshowga B ee Xilliga Dhalmada ee San Diego** wuxuu la shaqeyaa qoysaska iyo dhakhaatiirta si loo hubiyo in ilmaha la ilaaliyo goor hore.

Baaritaanka

- Dhakhtarkaagu wuxuu kaa baari doonaa cagaarshowga B inta aad uurka leedahay. Baaritaanka waxaa lagu taliyay uur kasta, xitaa haddii hore lagu baaray.
- Haddii lagaa helo cudurka cagaarshowga B, waxaa lagaa diiwaangelin doonaa Barnaamijka Kahortagga Cagaarshowga B ee Bilaha Dhalmada oo bilaash ah. Barnaamijkani waa mid ka duwan daryeelkaaga caafimaad ee caadiga ah, kaasoo aad ka heli doonto dhakhtarkaaga iyo kooxda cusbitaalka.



Adeegyada Barnaamijka

- Kalkaalisada maamulaha kiiska ayaa soo wici doona oo ku weydiin doona uurkaaga islamarkaana ku siin doona macluumaad ku saabsan barnaamijka.
 - Waxaa sidoo kale lagu soo diri doonaa warqad ay ku qoran tahay macluumaadka xiriirka ee kalkaalisada maamulaha kiiska iyo agab kale.
- Kalkaalisada maamulaha kiiskaaga ayaa kula shaqayn doona adiga iyo kooxdaada caafimaadka si loo hubiyo in ilmahaagu helo tallaallada iyo baaritaannada ay u baahanyihiin, iyo in lala wadaago agab kale oo waxtar leh.

Tallaallada iyo Baaritaanka

Ilmahaagu waa inuu helaa:

- Tallaalka cagaarshowga B iyo cagaarshowga B Globulin (Hepatitis B Immune Globulin, HBIG) 12 saacadood gudahood umusha kadib si loo helo ilaalin dheeraad ah.
- 3- 4-ta karojo ee soo hartay ee cagaarshowga B sida la qorsheeyay.
- Baaritaan dhiig oo tallaalka kadib ah (Post-Vaccine blood Test, PVST) si loo xaqiijiyo in ilmahaagu aanu qabin cudurka cagaarshowga B.
- Baaritaan dheeraad ah ama daaweyn, haddii loo baahdo.



Nala soo Xiriir!

- Ka booqo [Barnaamijka Ka Hortagga Cagaarshowga B ee Dhalmada](#) barta onlaynka.
- Iimay! PHS-PerinatalHepB.HHSA@sdcounty.ca.gov.
- Wac 866-358-2966 oo dooro 'ikhtiyaarka 5' si aad ula hadasho Kalkaalisada Caafimaadka Dadweynaha.



LIVE WELL
SAN DIEGO